

# Muddada Isqorista Gaarka ah

## Waa Maxay Isqorista Gaarka ahi?

Isqorista gaarka ahi waa waqtiga ka baxsan muddada isqoristaanka furan oo adiga iyo qosyaga aad isku qori kartaan caymis caafimaad iyada oo sababtu tahay in ay noloshaada ku yimaadeen dhacdooyinka qaarkood.

Guud ahaan, waxaad xaq u leedahay muddada isqorista gaarka ah oo ah 60 maalmood oo ka dambeeya dhacdooyin noloshaada ku yimid oo beddela xaaladda qoyskaaga (guur, canug dhasha, tusaale ahaan) ama caymis caafimaad kale oo kaa dhamaaday ama lagaa joojiyay.

## Dhacdooyinka Nolosha ee Qofka Xaqqa u Siiya

Dhacdooyinka nolosha ee qofka xaqqa u siiya isqorista gaarka ah waxaa ka mid ah:

- Korsashada sharciyeysan
- Xanaanada kumeelgaarka ah
- Canug dhasha
- Guur
- Wadani aad noqoto, xaaladdaada wadaninimo ama sharci oo isbeddesho
- Caymis caafimaad oo kaa dhamaada ama lagaa joojiyo\*
- Si hor leh oo aad xaq ugu yeelato, ama ugu yeelan waydo canshuur celin ama dhimitaanka kharashka la wadaago (waa kuwa ku qoran MNsure)
- Cinwaanka oo si joogto ah loo beddelo kaas oo fursado cusub qofka u siiya qorsheyaasha caymiska caafimaadka gaarka
- Iskuqoris xubin ka mid ah qabiil federaalku aqiinsan yahay

*\*Waxaad heli kartaa haddii aad lumiso xaq u yeelashadaada caymis caafimaad kale (oo ay sababtay shaqadii oo kaa dhamaatay ama lagaa joojiyay, adiga oo waaya Medical Assistance [Gargaarka Caafimaadka] ama MinnesotaCare). Ka mid ma aha caymis la'aan ay sababtay lacagtii caymiska oo la bixin waayay ama iska dhaafid caymis la heli karo.*

## Ka Soo Warbixi Isbeddelada

Sida ugu dhakhsaha badan uga soo warbixi wixii ah isbeddeladaan adiga oo soo wacaya MNsure 651-539-2099 ama 855-366-7873.



## Isqorista Sannadka oo Dhan

Macmiisha qaarkood waxay codsan karaan caymis sannadka oo dhan ah iyaga oo aan xaq u yeelan isqorista gaarka ah waxaana ka mid ah:

- Dadka xaqqa u leh MinnesotaCare iyo Medical Assistance
- Qoysaska Hindida Maraykanka ahi waxay isqori karaan sannadka oo dhan

